

# COVID-19

# KA JAWAABIDDA

# KHURAAFAADYA

# DA

Use this as:


- A presentation slide deck
- Download / share on social media
- Use as script for 1-2-1 discussions

Last updated 24th February 2021



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# **KHURAAFAADKA:** COVID kama halis badna hargabka



**XAQIIQDA:** COVID waxaa uu dilaa 10 jeer in ka badan hargabka.

Cilmi baaris lagu sameeyay Jaamacadda John Hopkins University ayaa muujisay in COVID uu yahay mid aad u halis badan, oo saameyn ku yeeshay dad badan muddo dheer (ilaa 30 maalmood) waxaa uuna u faafaa si ka dhakhsa badan hargabka

Sheegashada in COVID uusan ka khatar badnayn hargabka waxaa ay meesha ka saaraysaa burburka fayraskani uu u keenay nolosha dad badan.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# **KHURAAFAADKA:**

## Dhakhaatiirta guud waxay ka samaynayaan lacag badan tallaalada COVID



**XAQIIQDA:** Dhakhaatiirta waxaa lagu siiyaa £12.50 halkii irbad. Badankooda ma samaynayaan faa'iido. Qaarkood ayaa khasaaro gali kara.

### Tani waxaa ka mid ah bixinta:

- Shaqada dhaktarka (8-da subaxnimo – 8-da fiidnimo ilaa 7 maalmood usbuucii)
- Goobaha (tusaale ahaan hoolka/maktabadda) & qalabka
- Maamulka & shaqaalaha kalkaalada
- Tababaridda shaqaalaha & waxbaridda bukaankaTraining staff & educating patients
- La socodka bukaanada marka la tallaalo ka dib



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# **KHURAFAAADKA:** Tallaalka waxa uu keehaa waxyeello aan laga soo kabsan karin



**XAQIIQDA:** ma jiro bukaan ilaa hadda la il daran waxyeello aan laga soo kabsan karin – tijaabooyinka la qaaday ama dadweynaha dhexdoodaba


Khuraafaadkan ayaa la faafiyay iyadoo si khaldan loo akhriyay bandhig dhab ahaantii sheegay in 3, 000 oo ka mid ah kuwa la tallaalay ay la soo darseen waxyeello **ku-meel-gaar ah** iyo kuwa **laga soo kabsan karin.**

Daawooyinka dhammaan waxay leeyihii awood ay ku keeni karaan dhibaatoyn caafimaad, laakiin tani waxay u baahan tahay in lala miisaamo waxyeellada cudurka ay isku dayayaan in ay ka hortagaan.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# KHURAAFAADKA: COVID waxaa keena shabakada 5G



**XAQIIQDA:** COVID wuxuu ku faafayaa dalalka aan lahayn 5G. Ma jiro xiriir saynis ah.

Khuraafaadkani wuxuu billaabmay markii dillaaca COVID uu ku soo beegamay iyadoo 5G laga saaray magaalada Wuhan. Khuraafaadkani wuxuu iska indha tirayaa xaqiiqda ah in 5G laga billaabay deegaanada kale ee Shiiinaha ka hor inta uusan dillaacin COVID.

COVID wuxuu sidoo kale saameeyay dalal aan lahay 5G.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# KHURAAFAADKA: Dhimashooyinka COVID oo la buunbuuniyay



**XAQIIQDA:** Dhimashooyinka COVID ayaa badanaa in yar la sheegaa halkii la buunbuunin lahaa.

Inta badan dhimashooyinka la sheegay in uu keenay COVID waxay leeyihii suuf cudurka leh. In yar ayaa loo diiwaangaliyay COVID aan suuf la saarin haddii sawirka shucaaca ama astaamaha ay si xooggan u soo jeedinayaan COVID iyadoo aysan jirin sharraxaad kale iyo sameynta suuf saaridda dhimashada kadib waa wax aan fiicnayn / aan macquul ahayn.

Tani waxay la jaanqaadysaa dhaqanka caafimaad ee caadiga ah.

# KHURAAFAADKA:

Dhakhaatiirta waxay  
doonayaan in ay dadka ku  
khasbaan in la tallaalo



**XAQIIQDA:** Waxaan rabnaa in ay dadka iyaga  
go'aan gaaraan iyagoo ku saleynaya  
macluumaad dhab ah, oo aan ahayn  
khuraafaa.

Dalalka badankood waxay ku tiirsanaan doonaan  
waxbarasho halkii ay ku tiirsanaan lahaayeen hadal oo lagu  
qancinayo dadweynaha.

Si kastaba ha noqotee, waxay noqonaysaa mas'uuliyad darro  
xaggeena haddii aanan sheegin halka aan ka dareemayno  
dadka in lagu marin habaabinayo – mararka qaarkood si ula  
kac oo khatar ah.

# **KHURAAFADKA:**

## Maadooyinka uu ka kooban yahay tallaalka COVID waa **Xaaraam**



**XAQIIQDA:** Tallaalka Pfizer-BioNTech kuma jiraan wax maado xayawaan haba yaraatee.

Ku dhawaaqidda in shey la soo saaray uu yahay xalaal ama xaaraam waa baaq loogu talagalay culimada Islaamka kuwaas oo sannado bartay arrintani. Hal maado ka mid ahaanshaheeda ma aha qodobka kaliya ay tahay in la tixgaliyo.

Tallaaladii hore badankood, oo uu ka mid yahay tallaalka Pfizer-BioNTech, waxay caddeeyeen in ay yihiin xalaal inta badan hay'adaha aqoonta ku saleysan ee adduunka.

# **KHURAAFAADKA:**

## Tallaalada waxaa ku jira unugyo uurjiif ah oo la soo riday



**XAQIIQDA:** Tallaalada kuma jiraan unugyo  
uurjiif ah.

Tallaalada qaarkood (MA AHAN tallaalada Pfizer / Moderna ee COVID) asal ahaan waxay isticmaaleen unugyo uurjiif oo aad u khaas ah si uu u koro fayraska tobaneeyo sano ka hor.

Unugyada asalka ahaa ayaa ahaa fursadda kaliya ee waqtigaas. Unugyadan kuma jiraan tallaalada hadda jira waxayna caddeeyeen oo ay aqbaleen inta badan ururada diinta Islaamka ku saleysan ee ku baahsan adduunka.

# **KHURAAFAADKA:** Tallaalada waxa loo isticmaalaa in lagu raad-raaco dadweynaha



**XAQIIQDA:** Tallaalada kuma jiraan wax qalab raad-raac ah oo loogu talgalay in lagula socdo dadka

Mas'uuliyiin madax bannaan ee adduunka oo dhan kana kala socda dalalka tartanka uu ka dhexeeyo ayaa oggolaaday tallaalka mana aysan helin wax qalab raad-raac ah.

Xaqiiqda waxay tahay in ay jiraan siyaabooyin aad u fudud si loo raad-raaco dadka (taleefoonada gacanta/ kaararka bangiga iwm) marka loo eego raad-raacyo bayoolaji ah.

# **KHURAAFAADKA:** Tallaaladu ammaan ma aha – waa taas sababta aan loogu tijaabin haweenka uurka leh



**XAQIIQDA:** Haweenka uurka leh & carruurta badanaa laguma daro tijaabooyinka hore.

Tallaalada hadda jira ee COVID laguma talinayo in ay qaataan carruurta badankood marxaladdan hadda la joogo. Tilmaanta loogu talagalay haweenka uurka leh ayaa ah in go'aan la gaaro iyaadoo lagu salenayno khatarta iman karta. Tani macnaheedu ma ahan in ay amni darro ku tahay kooxahan.

Arrintani waxay ka turjumaysaa in iyaga aysan ku jirin kooxaha tijaabooyinka muhiimka lagu samaynayo waxayna calaamad u tahay habmaamuuska badbaadada ee la qaatay.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# **KHURAAFAADKA:** Shirkadaha daawooyinka waa xumaan oogayaal dhammaantood sidaa darteed ma aamini karno



**XAQIIQDA:** Warshadda daawooyinka ayaa mararka qaarkood u dhaqantay si anshax xumo ah laakiin tani macnaheedu ma ahan in aan diidno wax kasta oo ay sameeyaan.

Aqbalaadda teknolojiyaddu kuma saleysna anshaxa ama taariikhda anshax ee shrikadaha shaqsiyaadeed ee ku lug leh sida baraha bulshada, cuntada, gawaarida iwm.

Waxaan ka qaadanna kiniiniyada xannuun baabi'iyaha, anitibiyootigada iyo daawooyinka kansarka isla shirkadahaas.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# **KHURAAFAADKA:** Tallaalku waxaa loo aqbalay si deg deg ah si ammaan uu u noqdo



**XAQIIQDA:** Xawaaraha oggolaanshaha waxaa badnaa sabab u ahay in kharash lagu bixiyo si loo joojiyo caqabadda halkii qaab rakhii ah oo taxaddar la'aan ah loo sameyn lahaa.

Waxaa jiray iskaashi cilmiyeed oo aan horay loo arag oo caalami ah iyo maalgelin si loo abuuro tallaalka COVID. Dadaalkan caalamiga ah wuxuu u oggolaaday saynisyahannadu in ay ku shaqeeyaan xawaare joogto ah, oo ay ku dhameystiraan shaqo sanadooyin qaadan lahayd bilooyin gudahood.

# **KHURAAFAADKA:**

## Tallaalku wuxuu wax ka beddeli karaa DNA-gaaga




**XAQIIQDA:** Ma jirto qaab RNA uu ku beddeli karo DNA-da qof kasta.

Tallaalka Pfizer-BioNTech ee COVID wuxuu isticmaalaa teknolojiyadda mRNA. Tallaalka mRNA wuxuu barayaa unugyadeena in ay sameeyaan borotiin kicinaysa falcelinta difaaca jirka. mRNA waa la jejebinayaan wax yar ka dib marka uu jirka galo.

mRNA marna ma galayo bu'da unugga, halkaasoo lagu keydiyo DNA-deena.

# **KHURAAFAADKA: Khabiirka baaritaanka PCR ayaa sheegay in aan loo sameynin in lagu ogado cudurada sida COVID**



**XAQIIQDA:** Ma jirto wax caddeyn ah in Dr Kary Mullis, oo ah khabiirka nidaamka PCR, uu weligiis sidan yiri.

Nidaamka PCR wuxuu ka caawiyaa saynisyahannada in ay ogaadaan walaxda hidde-sidaha. Haddii muunad ay ku jirto maadada hidde-sidaha ee fayraska COVID markaas baaritaanku wuxuu noqonayaa mid laga helay cudurka.

Dr. Mullis wuxuu dhintay Bishii Ogosto 2019-kii, bilooyin ka hor markii kiiskii ugu horeeyay ee COVID la soo sheegay.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# **KHURAAFAADKA: PCR waa khalad wuxuuna culeys xad dhaaf ah ka dhigayaa caabuqa COVID**



**XAQIIQDA:** Ma jiro waxbaaritaan oo 100% sax ah laakiin ma jirto caddeyn muujinaysa in walaaca la xiriira caabuqa COVID iyo halista cudurka khalad laga sheegay.

In kasta oo ay jiraan natiijooyin been abuur ah oo togan iyo kuwa taban labadaba oo ka soo baxay dhammaan baaritaanada, macluumaadka ay ka mid yihiin tirada cisbitaalada la dhigay oo qabta astaamaha COVID iyo tirada dhimashada waxay na siinayaan tilmaam wanaagsan oo ah sida ay xaaladdu u daran tahay.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# **KHURAAFAADKA: 99.97% waxay ka bogsadaan COVID, laakiin 3% waxay waxyeello weyn ka qaadaan tallaalka**



**XAQIIQDA:** Tiradaasi waa khalad. Waa in aan xusuusannaa in ka badan hal milyan oo qof in ay u dhinteen fayraska halka malaayiin kalena ay la ildaran yihiin dhibaatooyin muddo dheer haysta.

Khatarta aadka u yar iyo badanaa waxyeellada muddada yar ah ee tallaalka kama cusla khatarta dhibaatooyinka muddada dheer ama dhimashada uu sababo COVID.

# **KHURAAFAADKA:**

## Xirashada maaskarada waxay u xun tahay caafimaakaaga



**XAQIIQDA:** Ma jirto wax caddeyn ah oo muujinaysa in xirashada maaskarada ay waxyeello leedahay, laakiin waxaa jirta caddeyn muujinaysa in maaskarada ay wax difaaci karto.

Waxaan dhammaanteen ay tahay in aan gacan ka geysanno in aan yareyno faafitaanka COVID. Waa in aan sii wadno ku dhaqmidda kala fogaanshaha dadka, xirashada maaskarada iyo gacmo dhaqashada si loo yareeyo faafitaanka COVID.

# **KHURAAFAADKA:** Waa in aan iska sugnaa difaaca jirka in uu iska difaaco cudurka



**XAQIIQDA:** Tirada dhimasho ee dhici doonta inta  
aan ku guuleysanin in uu jirkeena iska difaaco  
cudurka waxay noqon doontaa mid masiibadeeda  
leh.

Difaaca jirka uu iska difaacayo cudurka wuxuu suurtagal yahay  
haddii dadweynaha badankooda uu ku dhacay COVID.

Xog rasmi ah ayaa sheegaysa in in ka badan 2 milyan oo qof oo  
ku nool UK uu ku dhacay COVID. Si loogu guuleysto in uu jirka  
iska difaaco cudurka, tirada dhimashada sidoo kale way sii  
kordheysaa waxayna masiibo ku noqon doontaa dalkeena.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# **KHURAAFAADKA:** Haddii cisbitaallada ay aad u mashquulsan yihiin maxay cisbitaallada Nightingale u maran yihiin?



**XAQIIQDA:** “Cisbitaallada” Nightingale waxaa loo sameeyay sidii ITU ahaan oo aan loo sameyn xarumo kale oo badan. Ma jiraan shaqaale dheeri ah oo ka howlgali kara waqtigan la joogo.

Xogta ugu dambaysa waxay muujinaysaa in NHS ay la daalaa dhacayso tirada cisbitaal seexinta cusub ee uu sababay COVID.

Tani waxay ku jirtaa howlaha caadiga ah ee NHS-ta oo la khasbanaa in dib loo dhigo tusaale ahaan qalliinka ikhtiyaariga ah oo uu sabab u yahay COVID.

# **KHURAAFAADKA:** Kalkaaliso caafimaad ayaa qaadatay tallaalka COVID kuna dhimatay iyada oo kamarada ka hor muuqata



**XAQIIQDA:** kalkaalisada way suuxday. Markay soo kabsatay ka dib, waxay bixisay shir jaraa'id oo ay sheegtay in ay horay u suuxday iyadoo xannuun dareemaysay.

Kalkaalisada way bogsatay. Tallaalada waxaa la ansixiyay ka dib markii la falanqeeyay xog ammaan ah oo ka soo baxday tijaabooyin caafimaad oo ku saabsan tobanaan kun oo bukaan ah.

Xog dheeri ah ayaa hadda laga uruurinaya bukaanada qaadanaya tallaalka.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# **KHURAAFAADKA:** In la is tallaalo muhiim ma aha waayo waxaa jira noocyoo cusub oo COVID ah



**XAQIIQDA:** Ma jirto hadda wax caddeyn ah oo muujinaysa in tallaalada aysan difaaci doonin noocyada cusub.

Waa wax caadi ah in fayrasyada sida fayraska hargabka in ay ku dhacaan isbeddello hidde-side ah.

Saynisyahannadu waxay eegayaan astaamaha noocyada cusub. Kala duwanaanshaha yar yar inta badan ma saameeyaan waxtarka tallaalka.

# **KHURAAFAADKA:**

Tallaalada waxaa ku jira  
aalkolo sidaa darteedna  
lama oggola



**XAQIIQDA:** Tallaalka Oxford AZ waxaa ku jira ethanol qaddar yar oo la mid ah inta laga helo cuntooyinka dabiiciga ah ama rootiga.

Aqoonyahanno badan ayaa xukumay in tallaalka Oxford AZ la oggol yahay maadaama qaddarka ethanol uu aad u yar yahay.

Oggolaanshaha diimeed ee shey kasta waxaa leh aqoonyahannada in ay go'aamiyaan, marka fadlan u laabo kuwa aad ku kalsoon tahay.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

**KHURAAFAADKA:** Tallaalka COVID waxaa ku jira nooleyaal yar-yar oo la beddelay hidde-sidahooda kuwaas oo waxyeello u leh aadanaha .



**XAQIIQDA:** Fayraska ku jira tallaalka AZ ayaa la beddelay si uusan u tarmin oo uusan ugu keenin cudur jirkeena.

GMO-yada waxaa badnaa lala xiriiriyaan cuntada iyo beeraha waxaana loo isticmaalay daawooyinka la ansixiyay muddo sanado ah.

Tallaalka AZ ee COVID, fayraska waxaa loo beddelay si looga saaro maadadiisa caadiga ah ee hidde-sidaha. Tani waxaa lagu beddelay maado caawinaysa in la sameeyo difaac ka dhan ah COVID.

# **KHURAAFAADKA:** Tallaalada waxaa ku jira hilib doofaar ama waxyabaha kale ee xayawaanka ka soo farcama



**XAQIIQDA:** Ma jiraan hilib doofaar ama maadooyin kale oo xayawaan oo ku jira tallaalada hadda la heli karo.

Xataa duruufaha marka ay jiraan maadooyin aan la oggolaan karin in ay ku jiraan tallaalka, aqoonyahanno badan oo caan ah ayaa ku soo gebagabeeeyay in la oggolaan karo haddii aysan jirin fursado kale xogtuna ay muujinayso in tallaalku faa'iido leeyahay.

# **KHURAAFAADKA:**

## Tallaalada COVID ayaa kugu ridi kara COVID



**XAQIIQDA:** Maya. Kama qaadi kartid COVID tallaalka.

Tallaalada COVID waxay baraan habdhiska difaaca jirkeena in uu ogado lana dagaalamo fayraska keena COVID.

Nidaaman ayaa keeni kara waxyeello badanaa khafiif ah. Tallaalada hadda jira kaama dhigi karaan in aad la xannuunsato COVID.

# **KHURAAFAADKA: Tallaalada COVID waxay kaa dhigi karaan madhalays (aad awoodin in aad carruur yeelato)**



**XAQIIQDA:** Ma jirto wax caddeyn ah oo muujinaysa in tallaalada COVID ay keenaan madhalaysnimo.

Khuraafaadkani wuxuu billaabmay markii khabuur Jarmal ah oo ku takhasusay cudurada faafa uu soo jeediyay in tallaalka COVID uu keenayo in jirka uu sameeyo lid jidh-galayaasha anti-Syncytin-1. Wuxuu qiray in aysan jirin wax muujinayay in arrintu sidan ahayd.

Tiro haween ah oo tallaalka ku qaataj tijaabada gudaheeda ayaa tan iyo markii uur qaadeen.

# **KHURAAFAADKA:** Qaaditaanka COVID ka dib qaadashada tallaalka ayaa caddeyn u ah in tallalku uusan shaqeyneynin



**XAQIIQDA:** Habdhiska difaaca jirka ayaa qaadan kara dhowr maalmood ama usbuucyo si uu u soo saaro jawaab ka hortag ah ka hor inta uusan billaabban difaac ka dhan ah fayraska.

Tallaalka COVID wuxuu yareyn doonaa fursadaha lala dhibaatoonayo dhibaatooyinka halista ah ee COVID.

Ma jiro tallaal 100% waxtar leh, sidaa darteed qof walba waa in uu sii wadaa in uu qaato taxadarrada lagu taliyay si looga fogaado infekshinka.

# **KHURAAFAADKA: Uma baahnid tallaal haddii aad horay u qabtay COVID.**



**XAQIIQDA:** Lama oga muddo intee la eg ayu jirkaaga iska difaaci karo COVID marka aad ka bogsatid sida darteed waxaa talo ah in tallaalka la qaato.

Dadka uu COVID ku dhacay waxa dhici kara in ay ka ammaan galaan cudurka muddo billooyin ah. Laakin waxa loo baahanyahay cilmibaaris dheeraad ah. Shaqsiyaadkan waxey u gudbin karaan fayruska dadka kale.

Talada waqtigna xaadirka ah waa in 4 usbuuc la suga haddi COVID kugu dhaco inta aadan tallaalka qaadan.

# **KHURAAFAADKA: Waad xulan kartaa tallaalka COVID ee aad qaadanayso**



**XAQIIQDA:** Qofna lama siin doono xulasho saadka iyo helitaanka dartood. Tallaalka ugu wanaagssan ayaa sidee darteed ah kan lagu siiyo.

Dhammaan tallaalada la heli karo waxay bixiyaan difaac aad u sarreeya. Dadka waa in loo xaqiijiyaan in tallaal walba oo ay qaataan ay soo ansixisay MHRA buuxiyayna shuruudaha adag oo ku aaddan badbaadada, tayada iyo waxtarka.

# **KHURAAFAADKA:** Haddii aan go'aansado in aan qaadanin tallaalka, ma saamaynayo dada kale



**XAQIIQDA:** Go'aamadaada adiga kaliya kuma saameynayaan laakiin waxay saameynayaan dadka kale, gaar ahaan kuwa u nugul iyo kuwa jirran.

Waxay u badan tahay in la dhibtooto dhibaatooyinka daran oo muddada dheer ee COVID haddii aadan qaadanin tallaalka. Tani waxay culeys ku kordhin doontaa adeegga caafimaadka waxayna saameyn ku yeelan doontaa dadka la ildaran cudurada kale. Waxay sidoo kale saameyn ku yeelan doontaa dadka kuu dhow ee ay tahay in ay ku daryeelaan inta lagu guda jiro muddadan.

# **KHURAAFAADKA:** Waan yarahay waana khatar yarahay sidaa darteed tallaalka COVID la iiguma talagalin aniga



**XAQIIQDA:** Usbuucyadii la soo dhaafay, dadka da'doodu u dhexeyso 18 – 64 waxay tiradoodu gaartay 40% in maalinta kasta cisbitaal loo dhigo COVID.

In kasta oo halistu ku sareyso dadka waaweyn iyo dadka cudurada kale qaba, haddana COVID wuxuu saameyn karaa da' walba. COVID wuxuu keeni karaa dhibatooyin muddo dheer socda iyo dhimasho. Tallaalka waxaa loogu talagalay in uu yareeyo halista cawaaqib xumadan.

# **KHURAAFAADKA: Kaliya kuwa xannuunsan & waayeelka ayaa u dhimanaya COVID**



**XAQIIQDA:** Tani waa been waana anshax xumo.

Celcelis ahaan da'da ku jirta qayaha daryeelka degdegga ah waxay ka weyn tahay 60 sano jir. Xaaladaha horey u jiray ee halista qof kor u qaada waxay noqon karaan kuwa fudud sida neefta, sonkorowga ama cayilka saa'idka ah.

Nolosha oo dhan waa qaali iyadoo aan loo eegayn da' ama taariikh caafimaad oo hore. In si kale lagu taliyo waa wax dhibkeeda leh aana waafaqsneyn Islaamka.

# **KHURAAFAADKA:** Cidna mas'uul kama aha haddii tallaalandu dhibaato leeyihiiin



**XAQIIQDA:** soo-saareyaasha looma cafinayo dhammaan mas'uuliyadaha.

Si loogu dhiirigaliyo shirkadaha soo saara daawooyinka in ay soo saaraan tallaalada COVID iyagoo aanan galin khasaaro maaliyadeed oo xooggan, Dowladda ayaa siisay iyaga difaac ka dhan ah mas'uuliyadda madaniga ah waxayna ku dartay tallaalada Qorshaha Bixinta Khasaaraha Tallaalka.

Shirkaduhu weli waxaa saaran waajibaad loo baahan yahay in ay fuliyaan. Tani ma aha fikrad cusub. Tallaalo badan oo caan ah ayaa horeyba hoos yimid qorshahan.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# **KHURAAFAADKA:** Waxaa jira xirfadleyaal caafimaad oo ka soo horjeeda tallaalka COVID



**XAQIIQDA:** Inta badan xirfadleyaasha caafimaadka, khubarada caafimaadka guud iyo saynisyahannada waxay dhiirigalinayaan tallaalada COVID.

Saynisyahanno ka kala yimid adduunka ayaa isugu yimid in ay soo saaraan tallaalo COVID oo ammaan ah kuwaas oo gacan ka geysan doona badbaadinta kummanaan qof.

Sida xirfad kasta ay tahayba, waxaa jiri doonta tiro aad u yar kuwaas oo ka soo horjeeda fikirka la isku raacsan yahay. Doodadaha ayaa inta badan ku saleysan caddeyn.



BRITISH ISLAMIC  
MEDICAL ASSOCIATION

# **KHURAAFAADKA: Tallaalada waa in ay ahaadaan<sup>100%</sup>** ammaan ka hor inta aan loo siideynin shacabka



**XAQIIQDA:** Tallaladu waa hab ammaan ah oo looga hortago cudurada looga hortagi karo tallaalka laakiin ma jirto daawo 100% ammaan ah.

Tallaaladu waxaa lagu hayaa heer sare marka loo eego daawooyin kale oo badan laakiin waxaa muhiim ah in la abuurin yoolal aan macquul ahayn oo loogu talagalay daaweynta.

Ma jiraan waxyaaabo badan oo nolosha ka mid ah oo 100% ammaan ah.

# **KHURAAFAADKA: Dadka ayaa u dhimanaya tallaalada COVID-19**



**XAQIIQDA:** Dadka qaar ayaa dhiman doona marka ay qaataan tallaalka COVID ka dib. Tani macnaheedu ma aha in tallaalku uu ahaa waxa keenay dhimashada.

Haddii 10 milyan oo qof la tallaalo oo tallaalkuna uusan waxba waxyeello lahayn, 14, 000 oo qof ayaa weli la filan karaa in ay u dhintaan sababo aan guud ahaanba la xiriirin tallaalka.

Habka kaliya ee lagu ogaan karo in tallaaladu ay leeyihiiin waxyeello daran waa in la fiiriyo xogta laga helay dad badan oo la tallaaley lana barbardhigo waxa caadi ahaan laga filan karo dadka da'daas ku jira.